

AMARKA MAASKARADA GUDAHA

Hagitaanka Ganacsiyada




Mulkiilayaasha ganacsiga waxay leeyihiin doorar ku aadan sida loo hirgeliyo hagitaanka maaskarada ama af-xirashada inta la joogo gudaha meeshooda.

Maadaama **aysan jirin qaab sahlan oo lagu fiiriyo xaaladda tallaal** ee qofkasta oo soo gala dhismo, Amarka Sargaalka Caafimaadka Maxaligaa ee King County **wuxuu aad uga codsanayaa ganacsiyadu inay sii wadaan hirgelinta amarrada maaskarada ee loogu talagalay dhammaan shaqaalaha iyo macaamiisha** meelaha gudaha jooga.

Tillaabo	Waajib (DOH ama L&I)	Aad Loo- dhiirigeliyay (Amarka King County)	Ikhtiyaarka Ganacsiga
Dhaji calaamaddo u sheegaya dadka aan tallaalneyn ama tallaalka dhameystiran inay u baahanyihiin maaskaro taasoo ku qoran af ganacsigu inta badan isticmaalo	X	Dhaji calaamaddo ku dhiirigeliya qofkasta inuu isticmaalo maaskaro	
SHAQAALAHA:			
Ku waajibi isticmaalka maaskarada shaqaalaha aan tallaalneyn ama tallaalka dhameystiran	X		
Ku waajibi isticmaalka maaskarada shaqaalaha si kaamila u tallaalan		X	X
Ku waajibi caddeyn tallaalka shaqaalaha si ay u shaqeeyaan maaskaro la'aan	Waajib haddii ganacsiyadu oggolaadaan shaqaalaha si kaamila u tallaalan inay shaqeeyaan maaskaro la'aan		X
MACAAMIISHA:			
Ku waajibi isticmaalka maaskarada macaamiisha aan tallaalneyn ama tallaalka dhameystiran	X		
Ku waajibi isticmaalka maaskarada macaamiisha si kaamila u tallaalan		X	X
Ka codso caddeyn tallaalka macaamiisha			X

Khariidadda kore waxay faahfaahineysaa waxa ay waajibiyeen oo ku taliyeen Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington (DOH), Waaxda Shaqaalaha iyo Warshadaha Washington (L&I) iyo Caafimaadka Dadweynaha - Seattle & King County.



Waajibinta af-xirasho waa **QAABKA UGU BADBAADO BADAN** uguna **SAHLAN** si loo difaaco shaqaalahaaga, macaamiisha, iyo dadweynaha.

Hase-yeeshee, hadaad dooratid inaad u oggolaatid shaqaalaha iyo macaamiisha *si kaamila u tallaalan* inay noqdaan maaskaro la'aan, waa tan waxa aad sameyn kartid adigoo weli raacaya Amarka maaskarada:


1. **Xaqiiji xaaladda tallaal ee qofkasta** oo meesha soo galaya. Foomamka la-aqbali karo ee qoraallada tallaal waxaa ka mid ah:
 - Kaadhka tallaalka CDC
 - Sawir kaadhka
 - Qoraal ka yimid adeeg-bixiye caafimaad
 - Qoraal ka yimid nidaamka macluumaadka tallaalka gobol



Caddeynta nidaamka xaqiijintaan waa inay diyaar u ahaato L&I markii la codsado. Xaqiijinta xaaladda tallaalka shaqaalaha waa shardi ka yimid L&I haddii ganacsiyadu oggolaadaan shaqaalaha inay shaqeeyaan maaskaro la'aan.

2. **Samee nidaam ama hannaan lagu ilaaliyo dadka aan tallaalneyn inay sii wadaan xirashada maaskarada.** Tan sidaan bey u ekaan kartaa:
 - Samee qeybo khaas u ah dadka tallaalan gudaha dhismaha oo ugu yaraan u jira 6 feet qeybaha aan tallaalneyn
 - Samee waqtiyo gooni ah maalinta markii macaamiishoo dhan u baahanyihiin maaskaro iyo waqtiyo kale oo khaas u ah macaamiisha si kaamila u tallaalan kuwaasoo laga yaabo inaysan u baahneyn xirashada maaskaro.

3. **Dadka aan tallaalneyn ama tallaalka dhameystiran waa inay xirtaan maaskaro oo ilaaliyaan kala fogaanshaha jireed waqti kasta.**



Su'aalo dheeraada, la xiriir coronavirus@kingcounty.gov (jawaabo diyaar ku ah af).

Amarka Sargaalka Caafimaadka Maxaligaa (May 20, 2021) wuxuu jiri doonaa ilaa King County ka xaqiijiyo 70% degenyaasha 16 jir ka ah ama ka weyn in si kaamila loogu tallaalo King County. Markii taas la gaaro, ganacsiyada weli waa ku waajib inay sii raacaan sharuudaha maaskarada ee DOH iyo L&I ee ku qoran warqaddaan.

Wax badan ka ogow [Hagitaanka Af-xirashada DOH ee Ganacsiyada](#). (bogga Igiriis keliya)